



Haddii aad qabtid 'boronkiito'

Boronkiitadu waa hargab amma duri ku dhaca dhuumaha neef-mareenada. Waxa barara oo cadanyooda xuubka saaran neef-mareenda ee ka dhaadhaca cunaha ilaa sambabada. Astaanta u weeyn ee lagu gartaa waa qufac oo, celcelis ahaan, qofka haynkaraa ilaa 3 todobaad. Waxa kale oo uu qofku yeelankaraa xummad ama qandho iyo cunoxanuun iyo duuf.

Bronkiitada waxa keena fayrus; marmar se waxa keenikarta bakteeriya. Inta badan, boronkiitada sideedaa looga bogsada. Qufaca boronkiitadu wuxuu noqonkaraa mid darran laakiin waa habdhaqanka jidhku ku ilaaliyo sambabada. Qufaco wuxuu soo jaraa xaakada oo uu jidhka ka soo bixiyaa, haddii kale xaakada ayaa iska farisata sambabada, taas oo sambabada dhibaatooyin ku keenilaheed. Balqanka iyo xaakadu waxa kale oo ay qabtaan fayruska, bakteeriyada iyo boodhka neefsashada inoo raaca. Si kastaba ha ahaatee, qufucu wuxuu ka mid yahay hababka is-difaacidda jidhka. Run ahaantii, qufucu waa qaybta xanuunka ee sii jiidanta ilaa uu qofku si fiican uga wada bogsanayo boronkiitada. Inuu qufaco sii jiidamo waxa u sababa ah bogsashada neef-mareenada oo aan degdeg ku imanin ee waqti yara dheer qaadato.

Ku daweeynta antibiyootikada

Markay boronkiito ku hayso ee laakiin sambabado guud ahaan kuu caafimaad qabaan, looma baahna in lagugu daweeyo antibiyootika. Xataa haddii boronkiitada ay kuu keentay bakteeriyada caadiga ihi ama nooca loo yaqaan mikooblasma (oo ah nooc bakteeriya khaas ah) qaada-shada antibiyootikadu ma soo dedejinkarto ka-bugsiga boronkiitada. In kasta oo antibiyootikadu disho bakteeriyada, aakiin aanay dilin fayruska. Haddana mudada lagaga bogsankaro boronkiita ma soo gaabinkarto.

Ma fiicna in dawooyinka antibiyootikada la iska qaato. Waxa dhicikarta in antibiyootikadu kaa idleeyso nooca

baakteeriyada ee jidhka waxtarka u leh. Waxa kale oo iska qaadashada antibiyootikadu kugu keenikarta dhibaatooyin ay ka mid yahiin shuban iyo finan ka soo yaaca oogada. Waxa intaa dheer, in iska-qaadashada antibiyootikadu sababto inay baakteeriyadu u barato oo ay yeelato u-adkeeysi (resistanta). Haddii taasi dhacdo, waxa imanaysa in antibiyootikadu marka dambe waxba ka tariweeydo caabuqyada halista ah ee baakteeriyadu keento ee aad run-ahaan ugu baahankartid in antibiyootika lagaaga daweeyo.

Mararka qaarkood se, boronkiitada waa lagu daweeynkaraa antibiyootikada, siiba haddii uu qofku cudur la ogyahay sambabada ka qabo.

Talo

- Dawooyinka xanuunka bi'iyaa, sida baaraasitamooosha (paracetamol) iyo ibuborofeen (ibuprofen) hoos way u ridikaraan xummadda iyo laab xanuunka.
- Wax aan sida u sii ridneeyn ayay dawooyinka qufaco ka tarikaraan qufaca,
- Sigaar cabistu astaamaha boronkiitada way sii xummeysaa, waxanay qofka u keenikartaa in xanuunku ku soo noqnoqdo.

Fiiro gaar ah u yeelo

Inta badan 2 ilaa 3 todobaad ayay kugu qaadankartaa inaad si fiican uga bogsatid boronkiitada. Umma baahnid inaad werwertid, haddii uu qufucu kaa tagiwaayo laakiin sidaada kale aad u caafimaadqabtid oo aad si tartiib ah u soo ladnaaneeysid.

Haddii se uu xanuunku kugu cusboonaado ama kugu sii xumaado, ama haddii aad dhiig qufacdid, ama aad isku aragtid hiinraag ama neef-tuur, waa inaad dhakhtarka ku laabataa. Haddii qufaco 4 ilaa 5 todobaad kaaga tegiwaayo ama uu sanadka gudahiisa dhawr jeer kugu soo noqnoqdo ama uu kugu dhaco qufac tegiwaayaa, waa inaad dhakhtarka u tegtaa si sambabadaada baadhis loogu sameeyo.